

Dejinta Mudnaanta Guddiga Dugsiyada Boston

Sannadkii hore, Guddiga Dugsiyada Boston waxay ansixiyeen Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee shanta sano ee Kormeeraha Guud. Iyada oo lagu dadaalayo in la xoojiyo diiradda natiijooyinka ardayda, Guddigu wuxuu soo xulay laba nooc oo tallaabooyin ah oo si toos ah looga qaaday Qorshaha Istiraatiijiyadeed. Iyada oo loo marayo xogta isdaba joogta iyo macluumaadka kale, Guddiga Dugsiga ayaa si dhow ula socon doona una qiimeyn doona shaqadooda la xiriirta yoolalka la soo jeediyey. Qaabkan cusub wax kama badaleyso Qorshaha Istiraatiijiyadeed ama kuma kordhinayso yoolal cusub ama ilaalin howlaha degmada, taa bedelkeeda, waxay ka caawin doontaa Gudiga dib u habeynta iyo dib u xoojinta shaqadooda. Guddigu wuxuu u isticmaali doonaa shirarkiisa inuu si isdaba joog ah dib u eegis kusameeyo horumarka uu ka sameeyay Kormeeraha guud ee la xiriirta yoolalka iyo inuu xaqiijiyo in la raaco jidadka ilaalada ah. Kadib marka ay ansixiyaan Guddiga Dugsiga yoolalkaas iyo ilaalintooda, Kormeeraha guud ayaa maalgelin doona mudnaanta miisaaniyadda FY22 ee degmada. Guddigu wuxuu raadinayaa jawaab-celinta bulshada oo ku saabsan qabyo-qoraalka yoolalka iyo ilaalada hoos soosocoto.

Yoolalka La Filayo - Aragtida bulshada ee waxa ay tahay inay ardaydu ogaadaan oo ay awoodaan inay sameeyaan.

- **Tacliinta Hore:** Boston Public Schools (BPS) waxay sameyn doonaan shuruudaha ardayda ay ku yimaadaan fasalka 3 oo diyaar u ah inay ku horumaraan iskuulka iyadoo la xaqiijinayo in boqolkiiba ardayda K-2 ee buuxisa ama ka kormaro heerka laga filayo fasalka ee Qiimaynta Akhriska iyo Qorista dhamaadka sanadka ay kordhi doonaan laga bilaabo [w]% * Juun 2020 illaa [x]% * illaa Juun 2026.
- **Guulaha Bartayaasha Ingiriiska:** BPS waxay kobcin doonaan raasamaalka luqada iyo waxbarashada ardayda iyadoo xaqiijinayo in boqolkiiba ardayda Bartayaasha Ingiriisiga ee muujiya ugu yaraan [v]% * koritaanka imtixaanka Helitaanka ELL ay ka soo bilaaban doonaan [w]% * Juun 2020 illaa [x] % * illaa Juun 2026.
- **Guulaha Ardayda Naafada ah:** BPS waxay kobcin doonaan raasamaalka luqada iyo waxbarashada ardayda iyadoo xaqiijinayo in boqolkiiba ardayda naafada ah ee muujiya ugu yaraan [v]% * kobaca Boqolleyda Kobaca Ardayda Ingiriisiga (SGP) iyo kuwa kujira isugeyn buuxda ama qayb ahaansho inay ka kordhi doonaan oo ay ka soo bilaaban doonaan [w]% * Juun 2020 illaa [x]% * illaa Juun 2026.

- **Fikirka Xooggan ee Xisaabta, Sayniska, iyo Tacliinta:** BPS waxay bari doonaan ardayda inay awood u yeeshaan inay si caqli gal ah ku sababeeyaan, kufahmaan, una muujiyaan xirfada aqooneed ee xisaabta, sayniska iyo akhris-qorista si boqolkiiba ardayda fasalada 7-aad iyo 8-aad ee gaarsiiya heerka aqoonta ee akhriska, xisaabta, iyo sayniska ay ka soo bilaaban doonaan [x]% * Juun 2020 ilaa [y]% * illaa Juun 2026.
- **Diyaargarowga Xirfadda & Kulliyadda:** BPS waxay taageeri doonaan ardayda ka qalin jabineysa wakaaladda inay ku jiheeyaan mustaqbalkooda iyagoo xaqiijinayo in boqolkiiba inta qalin jabisay ee 1) dhammeystiray Shaqadayda iyo Qorshahayga Tacliineed (MyCAP) iyo 2) ama warshad/Waxbarashada Farsamada ee Xirfada (CTE) shahaadada, Baccalaureate caalami ah aqoonsiga, dhibcaha 3 ama wixii ka sareeya imtixaanka Meelaynta Horukacsan (AP), ama 20 saacadood oo ah laba buundo ayaa ka kici doona laga bilaabo [x]% * Juun 2020 illaa [x]% * illaa Juun 2026.

Dhowrida Illaalada - Qiyamyada bulshada ee aan gorgortanka laga geli karin oo ay tahay in la sharfo inta aan higsaneyno yoolalka.

- **Ka Qaybgalka Codka Ardayda & Qoyska:** BPS waxay ka faa'iideysan doonaan hodantinimada luqadda iyo dhaqanka ardayda iyo qoysaska iyadoo kordhinaysa codka ardayda lana abuurto iskaashiyo lagu aqoonsado qiimahooda, hantidooda, iyo baahidooda.
- **Iskaashiga Bulshada:** BPS waxay la shaqeyn doonaan la-hawlgalayaasha bulshada si loogu diyaariyo ardayda fursado aan xadidneyn oo caalami iyo kuwa maxalli ahba.
- **Sinnaanta & Fursadaha Nusqaamaha:** BPS waxay hirgelin doonaan, aaminimo, fursad iyo dhaqammada xirista farqiga udhaxeeya oo ku saleysan cilmi baaris iyo xog ku saleysan heerarka degmada, dugsiga, iyo fasalada.
- **Shaqaleynta & Kala Duwan Waxtar Leh:** BPS waxay shaqaaleysiin doonaan oo haysan doonaan shaqaale wax ku ool ah, midab ahaan iyo luqad ahaan kala duwan, dhaqan yaqaan ah oo awood u leh inay siiso dhaqan adag iyo luuqad ahaan xaqiijinaysa manhaj iyo khibrado loo dhan yahay oo u dabaaldegaysa hantida ardaydeena isla markaana siinaysa farxad iyo khibrad iskuul oo wanaagsan.

- **Taageerada Bulshada, Dareenka, & Jirka:** BPS waxay soo bandhigi doonaan Nidaam Taageero oo Tirooyin Badan leh oo caalami ah oo wax ka qabta arrimaha bulshada, dareenka, iyo jir ahaanta ee dhammaan ardaydaydeena.

** Guddiga Dugsiyada Boston waxay la shaqeynayaan Xafiiska Xogta iyo La Xisaabtanka ee BPS si loo soo saaro tallaabooyin dhowr ah.*